

Cashooyinka Xoolaha ugaarta

MUNAASABADAHA BULSHADA EE AY KAFAALA QAADAYAAN URURADA KHAYRIGA AH

Qaadashada xayawaannada duurjoogta ah ee lagu deeqo

Cashooyinka xoolaha ugaarta waa munaasabado bulsho halkaasoo xoolaha ugaarta oo sifo sharci ah lagu haystay loogu deeqo ururada khayriga ah kadibna inta la karsho dadwaynaha hilibka la siiyo. Ururada ganacsigu ma kafaala qaadi karaan cashooyinka.

Noocyo badan oo xayawaannada duurjoogta ah ayaa sifo sharci ah lagu ugaarsadaa si loogu adeegsado ciyaaraha iyo cuntada gudaha Minnesota. Qaar kamid ah tusaalayaasha ugu caansan waxaa kamid ah hilib eelo (venison), hilibka nooc ka mid ah shimbaraha (pheasant) iyo kaluunka.

Kahor intaadan aqbalin deeqda, xaqiiji in:

- Sifo sharci ah lagusoo qabtay.
- Uu yahay hilibka duur joogta oo nadiif ah (aan lagu darin soos ama hilib la warshadeeyay).
- La maqaar siibay labo saac gudahood
- markii lasoo dabay.
- Si fiican loo nadiifiyay, loo kaydiyay, laguna diyaarshay xarun ruqsad ka haysata Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA). Akhri [Ku deeqista deerada laga soo ugaartay gudaha Minnesota \(Donating hunter-harvested deer in Minnesota\)](#) si aad uga hesho liiska cunto diyaariyaasha venison ee ka qaybgalaaya.
- Xarunta ruqsada ka haysata MDA waa inay leedahay habraacyada caadiga ah ee shaqada oo qoran si meesha looga saaro suurtagalnimada jeermiska ka yimaada hilibka xayawaanka duurjoogta ah oo u gudba cuntada kale.

Diiwaan haynta

Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah ee Minnesota (DNR) ayaa ka doonaysa qaataha deeqda hilibka duurjoogta inuu risiid ka qaato deeq bixiyaha marka uu kala wareegaayo hilibka, uuna risiidkaan haysto. Deeq bixiyuhu waa inuu diyaarshaan risiidkaan ay ku qoran yihiin xogta soo socda:

- Magaca iyo ciwaanka deeq bixiyaha.
- Magaca iyo ciwaanka deeq qaataha.
- Taariikhda la wareejiyay.
- Qeexitaanka hadiyada, ayna ku jiraan lambarka iyo nooca.
- Lambarka ruqsada xayawaanka lagusoo
- dabay.

Si adag u kari

Heerkulka iyo waqtiga ayaa ah waxyaabaha ugu muhiimsan xakamaynta jeermiska cuntada ka dhasha ee cuntada ku jira. Ku kari hilibka duurjoogta heerkul gaaraaya 165°F ama ka badan muddo 15 ilbiriqsi ah.

Xanuunka wasaqda ee loo dhinto

[Xanuunka wasaqda ee loo dhinto \(Chronic Wasting Disease\) \(CWD\)](#) waa xanuun maskaxda ku dhaca oo loo dhinto kuna jira deerada, faras-duurka iyo goodirka, waxaana keena barootiin si qaab daran u samaysan, oo loogu yeero prion. Prion yada lagama helo hilibka murqaha, xataa marka deeradu caabuuq qabto. Cilmi baaris ayaa socota si loo qiimeeyo khatarta faafida caabuqa, hadduu jiro, uu ku faafi karo dadka.

Taxadarada soo socda waa in laga qaadaa deerada lasoo dabay, faras-duurka iyo goodirka:

- Keliya hilibka jiirka ah ee aan lafta lahayn waa in la isticmaalo.
- Hilibka waa in laga jaraa ayagoo la jabin laf dhabarta.

Qaybaha gaarka ah ee lagu yaqaano in prion yadu fariistaan waa inaan la cunin, ayna ku jiraan maskaxda deerada iyo goodirka, araxda, indhaha, sinta, tuleedada sanko iyo qanjirada dhuunta.

Macluumaadka

[Donating hunter-harvested deer in Minnesota \(www.dnr.state.mn.us/hunting/deer/donation/index.html\)](http://www.dnr.state.mn.us/hunting/deer/donation/index.html)

[Chronic Wasting Disease \(CWD\) https://www.health.state.mn.us/diseases/cwd/index.html](https://www.health.state.mn.us/diseases/cwd/index.html)